Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya

Barlamaanka Federalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 5-aad

Documentiga kalfadhiga 5-aad kulankiisa:7-aad

Kalfadhiga 5-aad.Tr: 03/11/2014

Kulankiisa:7-aad, sacada furitanka.10:55gh, sacada xiritanka.1:26gd.

Guntinta:156 xildhibaan.

Ajendaha:

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka.

2.Ansixinta Ajendaha.

3.U codeeynta Warbixinta Guddiga Difaaca Heshiiska Talyaaniga iyo Soomaali Ya.

4.U codeeyta Warbixinta Guddiga Maaliyadda eek u aadan xisaab xirka sanad-Ka 2013.

5.Warbixinta Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamuladda Gobollada iyo Amniga.

6.Iyo Wixii kale oo howl ah.

Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Barlamaanka Federalka Soomaaliya Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

Shirka waxaa furey Guddoomiyaha Golaha Barlamaanka Federalka Soomaaliya Mudane:muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,waxaana lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna Akhriyaya,Xildhibaan:C/qaadir Sheekh Baq-daadi.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu soo jeediyay,in loo codeeyo,Guddiga Difaaca Heshiiska Talyaaniga iyo Soomaaliya.

Codkana sidan ayuu u dhacay.

Inta Ogol ---------- 134 xildhibaan

Inta Diiday ---------- 3 xildhibaan

Inta ka Aamustay-------5 xildhibaan

Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan,wuxu ku dhawaaqay Codka loo qaaday Guddiga Difaaca Heshiiska Talyaaniga iyo Soomaaliya in uu sidaas Ansax ku yahay.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu soo jeediyay,in loo codeyo Warbixinta Guddiga maaliyadda ee ku aadan xisaab xirka sanadka 2013.

Codkana sidan ayuu u dhacay.

Inta Ogol ---------- 135 xildhibaan

Inta Diidan---------- 4 xildhibaan

Inta Ka Aamustay------15 xildhibaan

Guddoomiyaha Golaha Mudane:Muxamed Sheekh Cusman,Wuxuu ku dhawaaqay Codka loo qaaday Guddiga maaliyadda ee ku aadan xisaab xirka sanadka 2013,in uu sidaas Ansax ku yahay.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha Shacabka waxa uu ku soo dhaweyay,Guddo-omiye ku xigeenka Guddiga Arrimaha Gudaha iyo maamulada Gobolladaiyo amniga.

Xildhibaan:Daahir Aamin Jeesow, Guddoomiye ku xigeenka Guddiga,wuxuu Golaha ka hor Akhriyay,warbixinta Guddiga Arrimaha Gudaha,maamulada Gobollada iyo Amniga Qaranka ee Barlamaanka asagoo Gudanaaya waajibaadkisa shaqo ee Dastuuriga ah,iyo Qod.57 xarafkiisa(n) ee xeer hoosadka Golaha shacabka ee nafarayo in guddiyada ku wargaliyaan shaqooyinkooda golaha shacabka ee J.F.S.

Hadaba Guddiga wuxuu idiin soo diyaariyay warbixintii iyo wax qabadkii guddiga ee kalfadhigii 4-aad iyo xiliyadii fasaxa lagu jiray.

Waxqabadkii Guddiga,kalfadhigii 4aad,guddiga waxa uu yeeshay 21kulan oo u dhiganta 126 saacadood,taasoo macnaheeda yahay in guddiga uu shaqeynayay kulan kasta 6saacadood.

Taariikhda markey aheyd 29/03/2014 wuxuu guddiga la kulmay wasiirka wasaarada Amniga Qaranka iyo taliyaha ciidamada nabadsugida Qaranka ee NIS iyo taliyaha Ciidanka Booliska Qaranka Soomaaliyeed,taas oo an ku kala qaadaney is wareysiyo isla xisaabtan shaqo waxeyna nagu wareejiyen qorsho howleedkii wasaarada Amniga Qaranka.

Taariikhda markey aheyd 24/05/2014,waxaa xarunta Barlamaanka soo weerarey qolyaha nabad diidka ah ee Al-shabab,taasoo sababtay dhimasho iyo dhawac.

Arintaaso uu Guddiga horey ugu digay in ay soo socoto isla markana uu xiriir kala sameyay Taliyaha nabad sugida Qaranka Gen:Bashiir,taaso ay keentay in uu iscasilo Wasiirki Wasaarada Amniga Qaranka Mudane:Abdikariim Xuseen Guleed.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha ayaa soo jeediyay,Xildhibaano waxaad horey u go'aamisan in aan albaabada xirano saxaafadana ay dibad jog ahadan oo anaga kaliya isku soo harno,xildhibaano waxaa la yiri inta anan lagu xisaabin is xisaabi,

Xildhibaan:Cabdi Xaashi C/laahi,wuxuu soo jeediyay,saxaafada wey joogeysaa ma baxeyso wayo, wixii Barlamaanka looga Hadley ayay garsiinayan shacabka.

Xildhibaan:Cabdi Bare,wuxuu sheegey,waxan seken gareynayaa Xildhibaan,Cabdi Xashi,saxaafada ma baxeyso waayo,shacabka waxey naga aminsan yihiin figrad

xun waa in ay ogaadan shacabka waxeynu nahay iyo doodena waxey ku saab santahay.

Xildhibaan:Shariif Maxamed Cabdalla,wuxuu soo jediyay,wax kasta ayaa dhici kara waa in aan si hoose u wada hadalna oo albaabada xirana anaga kaliya isku soo harnaa.

Xildhibaan:C/qaadir Maxamed Sandheere,wuxuu sheegey,albaabka an xirano waa, an wada hadalno,waana wada hadli karnaa,waxaan qabaa in dadka kale naga baxan, waa in an isku soo harnaa anaga kaliya.

Xildhibaan:Maxamed Cumar Dhalxa,wuxuu soo jeediyay,waxan seken gareynaya Cabdi Xaashi,sababo jiro awged saxaafada waa muhiim mar walba waa nala eedeyaa Barlamaanka sidiisa waxa uu ka sameysan yahay hadal anaga aan is dhaliilno shacabkana hana maqlaan.

Xildhibaan:Fowsiya Xaaji Aadan,waxey sheegtey,in saxaafada ay joogan,wey wa-naagsantahay shacabka an matalno in ay namaqlan waxa an ka doodeyno iyo mowduuca uu ku saabsan yahay, waliba marka ay jirto arin xasaasi ah meel walba waa nalaga fiirsanaya oo nalaga dhageysanayaa.

Xildhibaan:Yuusuf Geele,wuxuu soo jeediyay,wax noo qarsoon ma jirto waa inla ogaadaa waxan ku hadleyno iyo fakarka an soo jeedineyno,waa in ay saxaafada iska joogan.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha Mudane:Muxamed Sheekh,wuxuu soo jeediyay, in cod loo qaado saxaafada in ay joogan iyo in ay baxan saxafada.

Codkana sidan ayuu u dhacay.

Inta ogol saxaafada in ay joogan ---------- 45 xildhibaan

Inta Diidan saxaafada ---------- 61 xildhibaan

Inta ka Aamustay ----------2 xildhibaan

Guddoomiyaha Golaha Mudane:Muxamed Sheekh Cusman,wuxu ku dhawaaqey codkii loo qaadey in saxaafada ay dibad jog ahadan sidaas ayu Ansax ku yahay.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha wuxuu soo jeediyay, in la sameyo Ajende, waayo qof walba waxa uu doono ayuu ku hadlayaa.

Xildhibaan:Xiis Muuse Cowl,wuxuu sheegey, in dooda ay ahato dood furan oo wax walba an kaga doodi karno.

Xildhibaan:Cali Dhuux,wuxuu soo jeediyay,waa in aan is tixgalinaa oo an ismaqalnaa waxa layiri saxaafada ha baxaan wey baxen waa in laysa saxaa dhibadan baa dhacay qof walba uurkiisa waxa ku jira waa in uu ka hadla 20sano ayaan bur-bur ku jirnay,anaga Barlamaan ahaan usuma nimaadno oo ma tashano aan ku soo noqono soomaali nimada iyo Qaranimada waa in an midownaa.

Guddoomiyaha Golaha Mudane:Muxamed Sheekh,ayaa soo jeediyay,xildhibano waxa is qortay 56 xildhibaan waa in qof walba uu hadlaa 3daqiiqo.

Xildhibaan:Maxamed Cabdule Gasey,wuxuu sheegey,waa in aan ka shaqeynaa wadada saxda ah iyo midnimada,waxaa naloo soo xuley in an matalno shacabka soomaaliyed wixii naloo idmadey waa in an ka soo baxna walalayaal aan midowno an u soo noqono Qaranimada umada soomaaliyeed.

Xildhibaan:Cabdi Rashiid Maxamed Xidig,wuxuu soo jeediyay,Barlamaanka waxa uu ka koobanyahay 275 xildhibaan mararka qaar lama helo kooram wa caajis

Guddoonka Barlamaanka qodobada uu soo saaray hadii uu meel marineyn waxa ka muuqata mugdi iyo qaladad badan sidaas laguma shaqeyn karo,Guddiga joogtada isagaa Barlamaanka ah wax walba ansixiya sida heshiisyada Turkiga,mahan in uu qol mugdi isku soo xiro go'an garo guddiga joogtada waa in wax laga bedelaa, waxaa jira isheysiga masu'liyinta Qaranka oo cakirnan badan ay ka jirto,hadana leysla shaqeyn Karin waa in la helaa 2 isla wada shaqeyn karta,Dastuurka iska hor imanayo waa in la saxaa Qodobka:90—100,ayaa isqilafayo hadana midna lama hayo,waa in meesha laga saaro kooxeysi,waxa jira dad siminar adayo oo yurub ah makii ay soo noqdan hadana ku kale lo diyariyo maxaa Qaranka dan u ah in aad abaartan ayaa loo bahan yahay.

Xildhibaan:Xamzo Sheekh Xuseen,waxey sheegtay,wan ku faraxsanahay cadadka aan manta ku fadhino waa in aan dib u eegis ku sameyna shaqadena waa in aam

tashanaa anago isku xiran oo dalka samata bixina Guddoomiye waad dhaaratey waxaan dooneyna in aad nala shaqeyso wixii qaldan aan iska saxno.

Xildhibaan:Shariif Maxamed Cabdalla,wuxuu soo jeediyay,is dhaliilka ceeb mahan maamulkana maahan sidii la rabey hadii lagu dadaalo waxaan qabaa in la maareyn karo, arinta soo noq-noqotay labada masu'l in dalka qal-qal la galiyo maahan,waxaa lasameyn karaa Guddi xaliya khilaafadka ayaa loo diri karaa,waa in aan isha ku heynaa cadaalada oo an ogaano ahmiyada ay leedahay.

Xildhibaan:Samaan,wuxuu sheegey,waan dhaaraney Dastuurka ayan ku dharaney mudo22 sano ayan dagaal ku jirna shuruucdi waxaa lagu hogaaminaya shaqsiyaad, madaxdii dalka ugu sareysay oo mar walba is dagaalaya,an wax ka qabano dhibaatada an soo celino nidaamka lagu gaari laha Dastuur iyo sharciyad.

Xildhibaan:Cusmaan Xaaji Cali,wuxuu soo jeediyay,anaga shaqooyin kena waxaa ugu muhiimsan sharcidajin iyo koontarolka hay'addaha,waxaan rabaa sidii kalfadhigii 1-aad,oo kale in lo soo celiyo Barlamaanka oo ay naga dhaxeyso wada shaqeyn, sidan dhaqan maahan waa leys khilafayaa hadii leysla shaqeyo khilaf waa imanayaa,tan kale ma aqbaleyno Nicholas key wixii uu ku hadlay,waxan rabaa Guddoomiye in si sharci ah loogu jawaabo Ergeyga.

Xildhibaan:Maxamed C/laahi Nuux,wuxuu sheegey,waxaa naheysta caqabado waa in aan kala saarnaa caqabadaha iyo dhaliisha aynu leenahay Nicholas key waxad ogtihiin in Barlamaanka dadaalay oo intas uu gaarsiyay,madaxda isbadalo wey ku iman karan,waxan doonaya in ay ka taxadaran madaxda khilafadka.

Xildhibaan:Shuuriye,wuxuu soo jeediyay,August 2012,ayaa nala doortay Guddoonka ma wado qof jecleysi,xildhibaano waxaan rabaa sharcigan ku heshii-nay in aad fulisan marxalada manta dalka uu ku jiro adinkaa xalinkara qof walbana adinkaa doortay oo ansixiyay,wixii qaldana adinkaa sixikara, waa in la ilaaliyaa Dastuurka iyo sharciga, Ergeyga waa safiir waxa uu sameyay waa gaf waa in qaraar laga soo sara.

Xildhibaan:Cabdi Xaashi C/laahi,wuxuu sheegey,inagu Barlamaan beynu nahay mooshin weynu keeni karnaa waa leys khilaafi karaa Madaxweynuhu wuxuu xaq u leeyahayhadey Rai'sal Wasaaraha ay is khilaafan Barlamaanka wuu u soo gudbin

karaa, laakiin xaashiyo cad-cad in aynu saxiixno maahan,Barlamaanka waa heshiisin kartan Masu'liyiinta, maamul kasto iyo degmo kasto ee la sameynayo waxaa loo geyaa Nicholaskey.

Xildhibaan:Cabdi Fatax Nuur Matan,wuxuu soo jeediyay,maalinta xilka naloo idmadey ilaa iyo hada ma gudano,waxaan matalnaa shacabka soomaaliyeed qaabka aan ku socono danta kuma jirto,sharciga waa in aan dhisnaa tosina,waxan u soo jeedinayaa 3da ugu sareysa midna uma hiilinayo,waxan soo jeedinaya in Barlamaanka cidgaar ah in uu la safan maahan in aan ku mashqulno dowladaha kale waa in aan waajibkena gudanaa.

Xildhibaan:Fanax,wuxuu sheegey,anaga waxan matalna shacabka,waa in golaha meelaha laga soo galayo la dhigaa dhagxaan,waxaa jirta in waqti badan la sugo kooramka xildhibaanada oo mar dambe ay yimaadan 139xildhibaan,taasna waa dib u dhac weyn,Dastuurka marka la sameynayay waxa lagu sameyay $150.000,khilafadka masu'liyinta waxa sababay Dastuurka oo qabyo qoraal ah.

Xildhibaan:Zeynab Maxamed Caamir,waxey soo jeedisay,inaan edeyno Guddoonka waa qalad,maxaa loo wayay Rag nadiif ah oo u kala taga 2da madax oo heshiisiya,ilaahay aan ka cabsano Barlamaan jira ma ihin an iskaga tagno mesha,Guddoomiye waa in dad Barlamaanka ah kitaab lamariyaa oo sulux la dhexdhigaa 2da madaxloo diraa si ay u heshiisiyan.

Xildhibaan:Cabdi Bare Yuusuf Jibriil,wuxuu sheegey,anaga ma nihin Barlamaan fiican oo sharaf leh maalin walba mooshin ayaan u taganahay,Ergeyga waxa uu arkey waraaqaha cad-cad ee naloo keno waa wuxuu naga arkey ee anaga marka hore aan is toosino yaan ku mashquulin mooshin.

Xildhibaan:Cusmaan Cilmi Boqore,wuxuu soo jeediyay, hadii sharciga uu liico wax soconaayo ma jiraan,aawey sharcigii hore muxuu u shaqeyn waayay,walaalayal aan u shaqeyno sidii uu Barlamaanka ahan jirey,waa in aan nidaamka dhowrnaa hadii Guddoonka la dhaliilay aan u sheegno.

Xildhibaan:Nuur,wuxuu soo jeediyay,Mudane:Guddoomiye waxan kaa codsanay-aa saacadi wey dhamaatey in ta hartay in aad bari nooga dhigtit.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha wuxuu soo jeediyay,xildhibaan waxa noo haray dadkii is qorey 43 qof dooda dhiman bari ayaan dhameystiri doonaa hadii alle idmo.

Shir Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Barlamaanka Federalka Soomaaliya Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,uu shir Guddminayey kalfadhiga5-aad, kulankiisa:7-aad,uu sheegey in uu shirka xiran yahay sacada markey aheyd 1:26gd.